



Amarka caafimaadka dadweynaha ee burinaya shuruudaha ku xirashada afxirka gudaha dugsiga

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay aqbaleen sharciga ku xirashada afxirka dugsiga ee joogtada ah markay ahayd Janaayo 28, 2022. OAR 333-019-1015. Sida ku cad sharciga ah in Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka ama Sarkaalka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka uu soo saari karo amar burinaya shuruudaha ku xirashada afxirka dugsiga haddii shuruudahaas aysan dib dambe lagama maarmaan ugu ahayn in la xakameeyo COVID-19.

Laga bilaabo Maarso 11, 2022 kadib 11:59 galabnimo, shuruudaha ku xirashada afxirka dugsiga ee OAR 333-019-1015 dib dambe uma jirayaan. Shuruudaha ku xirashada afxirka dugsiga lagama maarmaan ma ahan sababtoo ah saamaynta COVID-19 ayaa hoos ugu dhacday gudaha Oregon qaabab dhowr ah, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn:

- Isbitaalo dhigista uu keeno COVID-19 ayaa hoos uga dhacay 300.
- Laga bilaabo Maarso 8, 2022, celceliska 7-da maalmood ee 520 kiisas/maalintii ayaa 94% ka hooseysa heerkii ugu badnaa ee 8,209 kiisas/maalintii markay ahayd Janaayo 20; sidoo kale waa tirada celceliska 7-da maalmood ee ugu hooseysay ee aan aragnay tan iyo bishii Luulyo 2021.
- Laga bilaabo Maarso 9, 2022, boqolkibo 75.5% dadka da'doodu tahay 18 iyo wixii ka weyn ee ku nool Oregon waxay qaateen tallaalkooda aasaasiga ah ee COVID-19, taxanaha tallaalka ee aasaasiga ah marka loo geeyo difaaca jireed ee dadka dhowaan ka soo bogsaday COVID-19 intii lagu gudajiray kor u kacayadii ugu dambeeyay ee uu keenay nooca Delta iyo noocyada kala duwan ee Omicron.

OHA waxay kula talinaysaa dadka halista sare ugu jira cudurrada daran iyo isbitaal dhigista, gaar ahaan bulshooyinka leh heerar dhexe ah ama sare ah ee isku gudbinta cudurka sida ku cad [Heerarka Bulsheed ee COVID-19 ee Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada \(CDC\)](#), inay sii wadaan ku xirashada afxirka goobaha gudaha, oo ay ku jiraan dadka:

- Aan tallaalnayn,
- Dadka difaaca jirkoodu hooseeyo,
- Dadka leh xaaladaha caafimaad ee kale,


- Jira 65 ama ka weyn, ama
- La nool kuwa kale oo halista sare ugu jira cudurka daran.

OHA waxay sii wadi doonaan inay ka shaqeeyaan sidii ay u kordhin lahaayeen helida tallaalada, afxirada tayada leh, baarista iyo daawaynta bulshooyinka sida aan sida aan kala sooca lahayn u saameeyay COVID-19.


Ma jiro wax ku jira amarkan oo ka mamnuucaya degmo-dugsiyeedka inay uga baahato shaqaalaha, ardayda, isxilqaamayaasha iyo booqdayaasha inay xirtaan afxirka. Shakhsiyaadka raba inay sii wadaan xirashada afxirka si ay uga hortagaan COVID-19 waa u xor inay sidaasi sameeyaan.

Shuruudaha xirashada afxirka ee loogu talagalay goobaha daryeelka caafimaadka sida ku cad OAR 333-019-1011 ayaa weli dhaqangal ah.

Taariikhdu markay ahayd 11-ka Maarso 2022.



Rachael Banks
Agaasimaha Caafimaadka Dadweynaha
Maamulka Caafimaadka Oregon
Qaybta Caafimaadka Dadweynaha



Dean Sidelinger
Health Officer and State Epidemiologist
Maamulka Caafimaadka Oregon
Qaybta Caafimaadka Dadweynaha

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa xogta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xirii Qeybta Isgaarsiinta COVID-19 ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us